

**Macluumaadkaaga.
Xuquuqdaada.
Wajibbaadkeena.**

Ogeysiiskan wuxuu tilmaamayaa sida xogta caafimaadeed oo adiga kuugu saabsan loo isticmaali kara ama loo bandhigi kara iyo sida aad u heli kartid macluumaadkaan. Fadlan dib u eegis ku sameey.

**Adiga
Xuquuqdaada**

Marka ay timaado xogta caafimaadkaaga, waxaad leedahay xuquuq gaar ah.

Qeybtaan waxey cadeneysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah wajibbaadkeena si aan ku caawino.

**Hel nuqul oo
elegtroonig ah ama
ama mid qoraal ah oo
diiwaanka xogtaada
caafimaad ah**

- Waxaad weydiisan kartaa inaad aragto amaa aad hesho nuqul elegtroonig ah ama warqad oo ah xogta xaaladaada caafimaad ama macluumaadkaaga kale ee caafimaad oo adiga kuugu saabsan. Naweydii sida aan arintaan u sameyno.
- Waxaan bixineynaa nuqul ama warbixin gaaban oo ku saabsan xogtaada caafimaad, caadi ahaan 30 maalmood gudahood codsigaada ka dib. Waxaa laga yaabaa inaan lacag ku saarno sida uu ogol yahay sharciga gobolka.

**Na weydiiso inaan saxno
xogtaada qoraalka ah ee
caafimaad**

- Waxaad naweydiisan kartaa inaan saxno xogta caafimaad oo adiga kuugu saabsan ood u maleyneysa iney qalad tahay ama ay dhiman tahay. Naweydii sida aan arintaan u sameyno.
- Waxaa laga yaabaa inaan “diidno” codsigaada, laakiin waxaan si qoraal ah kuu sheegeynaa sababta mudo 60 maalmood gudahood ah.

**Codso xog dhowris
Xiriirada**

- Waxaad naweydiisan kartaa inaan si gaar ah kuula soo xiriirno (tusaale ahaan, telefoonka guriga ama xafiiska) ama inaan warqad kuugu soo dirno cinwaan kale.
- Waxaan “ogolaaneynaa” dhammaan codsiyada macquulka ah.

**Naweydiiso inaan xadidno
waxa aan isticmaalno ama
aan wadaagno.**

- Waxaad naweydiisan kartaa **inaan** isticmaalin ama wadaagin macluumaadka qaar ee caafimaadeed si lagu daaweeyo, lacag loogu bixiyo ama loogu isticmaalo howlaheena. Noogalama baahno inaan ogolaano codsigaada waxaana dhihi karnaa “maya” haddii ay saameyneysa daryeelkaada.
- Haddii aad si kaamil ah jeebkaada lacag uga ka bixiso adeeg ama daryeel caafimaad, waxaad naga codsan kartaa inaan wadaagin xogtaas si lacag loogu bixiyo ama howlaheena ceymis bixiyahaada dartood. Waan “ogolaaneynaa” haddii uusan sharci naga rabin inaan wadaagno xogtaas.

**Hel liiska kuwa aan la
wadaagnay xogta.**

- Waxaad weydiisan kartaa liiska (xisaabinta) wakhtiyada aan wadaagnay xogtaada caafimaad mudo lix bilood ah ka hor taariikhda aad weydiisatay, cidda aan la wadaagnay, iyo sababta.

- Waxaan ku dareynaa dhamman inta jeer oon soo bandhignay xogtaada inta aan ka eheyn kuwa ku saabsan daaweynta, qaaramaha, iyo howlaha daryeelka caafimaad iyo soo bandhigyada kale (sida kuwaa aad naweydiisatay inaan soo bandhigno). Waxaan bixineynaa hal jeer oo xisaabin bilaash ah sanad walba laakiin waxaan ku saareynaa qiima macquul ah, lacagta qaaramaha haddii aad codsatid 12 bilood oo kale.

**Hel nuqulka
ogeysiiskan xog
dhowrista ah.**

- Waxaad weydiisan kartaa nuqulka ogeysiiskan wakhti walba, xitaa haddii aad ogolaatay inaad ogolaato inaad ogeysiiska ku hesho qaab elegtroonig ah. Waxaan ku siineynaa nuqul warqad ah si dhakhsi ah.

**Xulo qof wax
kuu qabto.**

- Haddii qof aad siisay awood uu wax daaweyn ah kuugu sameeyo qareen ahaan ama haddii uu qof yahay mas’uulkaaga sharciga ah, qofkaas wey isticmaali karaan xaqaada waxeyna sameyn karaan go’aan ku saabsan xogtaada caafimaad.
- Waxaan hubineynaa in qofka uu leeyahay awood uuna wax kuu qaban karo ka hor intaan wax tilaaba ah qaadin.

Diiwaan geli cabasho haddii aad dareento in xuquuqdaada lagu tacadiyay.

- Waad caban kartaa haddii aad dareento inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada adoo nala soo xiriiraya islamarkaana isticmaalaya macluumaadka bogga 1- aad.
- Cabasho aayaad ka diiwaan gelin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Baniadamka ee Mareykanka ee Xuquuqda Shacabka adoo warqad ku soo diraaaya cinwaanka 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, ama wacaayaa telefoonka 1-877-696-6775, ama booqanaaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints.

Adiga Xuquuqdaada

Xogta qaar ee caafimaad, waxaad noo sheegi kartaa dooqyadaada ku saabsan waxa aan wadaagno. Haddii aad leedahay dooq gaar ah oo ku saabsan sida aan u wadaagno xogta qaababka hoos lagu xusay, nala soo xiriir. Noosheeg waxa aad rabtid inaan sameyno, waana raaceynaa talooyinkaada.

Xaaladahaan marka ay jiraan, waxaad xaq ama dooq u leedahay noo sheeg si aad:

- La wadaag xogta qoyskaada, asxaabta kuugu dhow, ama kuwa kale ee ku lug leh daryeelka
- Wadaag macluumaad marka lagu jiro xaaladda degdegga ah sida looga baxo
- Geli xogtaada diiwaanka isbitaalka

Haddii dooqdaada aad noo sheegi karin, tusaale ahaan haddii aad miir daboolan tahay, waan wadaagi karnaa xaaladaada miir daboolka ah haddii aan aaminsanahay inay dan kuugu jirto. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaan wadaagno xogtaada marka loo baahdo in la yareeyo khatar weyn oo wajahan caafimaadka ama badbaadada.

Xaaladahaan marka ay jiraan, anaga *marnaba* ma wadaagno xogtaada ilaa aad fasax qoraal ah naga siiso:

- Sababaha Suuq Gelinta
- Iibinta xogtaada
- Inta badan wadaagidda qoraalada ku saabsan daaweyntaada dhimirka

Xaaladdaan oo kale oo ah lacag uruurin:

- Waxaan kuula soo xiriiri karnaa in lacag la uruuriyo darteed, laakiin waxaad naweeydiisan kartaa inaan mar dambe kula soo xiriirin.

Isticmaaladeena iyo Soo Bandhigiddeena

Sideen u isticmaalnaa dhab ahaan ama aan u wadaagnaa xogtaada caafimaad?

Waxaan si gaar ah ugu isticmaalnaa ama aan u wadaagnaa xogtaada caafimaad qaababkaan soo socda:

Maamulka hay'adeena

- Waan isticmaali karnaa xogtaada caafimaad waana la wadaagi karnaa saraakiil kaloo caafimaad oo ku daaweynaayo.

Tusaale: Dhakhtar kaa daaweynaaya dhaawac wuxuu weydiinayaa dhakhtar kale xogtaada guud ee caafimaad.

Daaweynta aada

- Waan isticmaali karnaa waana wadaagi karnaa xogtaada caafimaad si aan howlaheena ugu wadano aan ku wanaajino daryeelkaada iyo kuula soo xiriirno marka loo baahdo.

Tusaale: Waxaan u isticmaaleynaa xogtaada caafimaad si aan u maamulno daaweyntaada iyo adeegyada lagu siinaayo.

Siddee kaloon ku wadaagi karnaa ama u isticmaali karnaa xogtaada caafimaad? Waxaa noola ogol yahay ama nagala rabaa inaa xogtaada ku wadaagno qaabab kale oo ku habboon danta umadda, sida caafimaadka bulshada iyo cilmi baarista. Waa inaan kasoo baxnaa shuruuda badan oo sharci ah ka hor inta aan wadaagin xogtaada sababahaan dartood. Si aad macluumaad dheeri ah u heshid booqo: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/comumers/index.html.

Taageero ah xagga caafimaadka bulshada iyo arimaha badbaadada

- Waan wadaagi karnaa xogta caafimaadka ee adiga kuugu saabsan marka ay jiraan xaalada gaar ah sida:
 - Ka hortagga cudurada
 - Marka dib loo soo celinaayo shey la soo saaray
 - Marka la soo sheegaayo xaalada lagala kulmay daawooyin
 - Marka la soo sheegaayo xadgudub laga shakisan yahay, daryeel la'aan ama rabshad la xiriirta qoyska
 - Ka hortagga ama yareynta khatar weyn oo la xiriirta shakhsiga caafimaadkiisa ama badbaadadiisa

Sameynta Cilmi Baaris ama Baaritaan

- Waan isticmaali karnaa waana wadaagi karnaa xogtaada caafimaad si ay baaritaan ama cilmi baaris u sameyno.

Ka jawaabidda codsiyada bixinta xubnaha jirka

- Waan la wadaagi karnaa xogtaada caafimaad hay'ad qaadato xubnaha jirka.

Ku dhaqan Sharciga

- Waan wadageynaa xogtaada haddii sharciyada maamulka ama kuwa gobolada ay u baahdaan, iyadoo ka mid tahay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Baniadamka haddii ay rabto inay aragto inaan ku dhaqmeyno sharciga gobolada ee xog dhowrista.

La shaqeyey baara caafimaad agaasimaha aaska

- Waan la wadaagi karnaa xogta caafimaadka baaraha sababaha dhimashada, baara caafimaad, ama agaasime aas marka uu qof dhinto.

La tacaal magdhawga shaqaalaha, dhaqan gelinta sharciga, iyo codsiyada kale ee dowladda

- Waan wadaagi karnaa xogtaada caafimaad:
 - Codsiyada magdhawga shaqaalaha
 - Sharci meelmarinta darteed ama sargaal sharci dhaqan geliya ah.
 - Shirkado kormeer caafimaad sameeyo oo qabanaaya howlo sharciga uu u ogolyahay.
 - Howlaha rasmiga ah ee dowladda sida militariga, ammaanka qaranka iyo Adeegyada Badbaadada ee madaxweynaha.

Ka jawaab Dacwadaha iyo tilaabooyinka sharciga

- Waan wadaagi karna xogta caafimaadka ee adiga kuugu saabsan marka jawaab u tahay xukun maxkamadeed, ama amar maamul ama wareegto.

Waxaa jira macluumaadka qaar ee caafimaadeed oon ku bixin karno fasaxaada oo kali ama amarka xaakinka:

Xaaladda cudurka HIV/Natijoooyinka baaritaank (Mid walbaa waa inaad qoraal ku fasaxdaa)	Xiriirada Shaqaalaha Bulshada
Ogolaansha Ilma soo rididda	La talinta Dadka ku Waxyaaloobay Tacadiyada Guriga
Cudurada laga kala Qaada Galmada	La talinada Dadka ku Waxyaaloobay Falalka Kufsiga la xiriira
Natijoooyinka Baaritaanada Asliyadda	Rikoorka Khamriga & Isticmaalka Maandooriyaha
Xiriirada aad la yeelatay Bixiyayaasha Daryeelka Caafimaadka Dhimirka (tala bixiyayaasha, dhakhaatiirta dhimirka, kalkaaliyayaasha caafimaadka dhimirka, la taliyayaasha sharcieysan ee dhimirka, guurka iyo qoyska iyo la taliyayaasha dhanka waxbarashada, iyo kuwa dhanka qoyska)	

Ilaa Goormaa Ayaan Hayneynaa Xogtaada?

Waxaan qoraal ahaan ku keydinaa xogta caafimaadka, qaab elektroonig ah ama sawir ah waxaan aan haynaa ilaa (20) sano ka dib marka qofka laga saaro isbitaalka ama marka daawada ugu dambaysa lasiiyo. Filimiyada raajatada iyo sawirada, rikoorka muuqaalada kale, la socodka dhaqdhaqaaqa wadnaha oo qoraal ah ee loo yaqaano EEG/EKG tracings; baaritaano lagu dareemo dhaqdhaqaaqa iyo xogta raasimaalka ah ee baaritaanada dhimirka ma han in la sii haayo mudo dheer waana la burburin karaa (5) sano ka dib taariikhda adeegga.

Waajibaadkeena

- Waxaa uu sharciga naga rabaa inaan sugno habdhaqanka xog dhowrista iyo ammaanka ee xogtaada caafimaad ee dhowrsan.
- Sida ugu dhakhsiyaha badan ayaan kuugu ogeysiineynaa haddi wax xadgudub ah uu dhaco oo laga yaabo inuu wax u dhimo dhowrsanaanta xogtaada ama ammaanka xogtaada.
- Waa laazim inaan raacno shuruudda xog dhowrista lagu tilmaamay ogeysiiskan aana ku siino nuqulkiisa.
- Maisticmaaleyno mana wadaageyno xogtaada inta aan ka eheyn sida lagu tilmaamay haddii fasax qoraal ah aadan nasiinin. Haddii aad noo sheegto, wakhti walba waad badali kartaa fikirkaaga ama go'aankaaga. Qoraal nagu ogeysii haddii fikirkaada uu wax iska badalo.

Si macluumaad dheeri ah aad u heshid eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.

Isbadalada Shuruudaha Ogeysiiskan

Waan badali karnaa shuruudaha ogeysiiskan, iyo isbadalada waxey saameynayaan dhammaan xogta aan kaa hayno. Ogeysiiska cusub diyaar ayuu noqonayaa marka laga codsado, xafiiskeena, iyo websaytkeena.

Taariikhda uu bilaabanaaya ogeysiiskan waa Sebteembar 23, 2013.

Ogeysiiskan ee Xog Dhowrista ah wuxuu quseeyaa hay'adahaan soo socda.

- Sargaal walboo caafimaad oo ogolaasha u haysto inuu buuxiyo xogtaada caafimaad keydka isbitaalka
- Daryeel caafimaad bixiya walboo xubin ka ah Daryeelka BMC Iyo Shaqaalaha Daryeelka Ilkaha Bixiya
- Dhammaan xubnaha howlwadeenada BMC, iyadooy ka mid yihiin shaqaalaha, adeeg bixiyayaasha, tabarucayaasha iyo dadka kale ka howlgala isbitaalka

Xarunta Caafimaad ee Boston iyo xarumahaan soo socdo ee Boston HealthNet waxey wadaagaan macluumaadka caafimaad si ay uga qeyb galaan nidaamka bixinta daryeelka isku jirka ah ee caafimaad islamarkaana ay wadaagaan howlaha badan sida qiimeynta tayada adeegyada:

Codman Square Health Center
The Dimock Center
Dorchester House Multi-Service Center
East Boston Neighborhood Health Center
Geiger-Gibson Community Health Center
Greater Roslindale Medical and Dental Center
Harvard Street Neighborhood Health Center
Health Care for the Homeless

Manet Community Health Center
Mattapan Community Health Center
Neponset Health Center
South Boston Community Health Center
South End Community Health Center
Upham's Corner Health Center
Whittier Street Neighborhood Health Center

**Kala Xiriir Sargaalka Xog Dhowrista 617-414-8100; TTY: 800-439-2370 (dadka maqalka uu ku adagyahay)
privacyofficer@bmc.org
www.bmc.org**